**SHARCIGA BANGIGA**

**SHARCIGA 14 Agoosto 1963, lamb. 18**

**XEERKA BANGIGA**
Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Kadib oggolaanshaha Golaha Shacabka ee Qaranka

**WUXUU SOO SAARAY**

Shariga sidatan xeerinaya:

## CINWAANKA 1AAD
Amarrada Guud

### Qod. 1
### Hey'adaha Amaahinta

1. Waxaa lagu tilmaama "Hey'adaha Amaahda" kuwa dowliga ah, bangiyada qaranka, laamaha bangiyada dibadda, hey'adaha gaarka ah oo loo fasaxay ururinta iyo keydka hantida iyo adeegga amaahinta nooc kastoo ah.
2. Howlaha hey'adaha amaahinta waa mid dan guud ah, waana in ay leeyihin ruqsad, hoosna yimaadaan kormeerka Dowladda, sida uu farayo sharcigaan.
3. Waxaa reebban in ay isticmaalaan erayada 'bangi', ama 'hey'ad amaaheed', ama 'keydka' iwm hey'ad kasta Qarameed ama shisheeyeed oo ka shaqeysa dalka Soomaaliya oo aan horay u haysanin ruqsad.

### Qod. 2
### Hey'adda Guddiga Keydka iyo Amaahinta

1. Si loo dhowro Keydka, kormeeridda howlaha amaahinta waxaa la dhisayaa Guddiga Keydka iyo Amaahinta iyagoo adeegsanaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.
2. Guddigasi oo madax ka yahay/tahay Wasiirka Maaliyadda ,wuxuu ka kooban yahay Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, Wasirka Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha, Wasiirka Howlaha Guud iyo Isgaarsinta iyo Agaasimaha Guud ee Bankiga Dhexe. Xoghaynta Guddigaan waxaa noqonaaya Agaasimaha Guud ee Bangiga Qaranka.

### Qod. 3
### Ilaalinta iyo kormeerka hey'adaha amaahinta

1. Howlaha ilaalinta iyo kormeeka hey'adaha amaahinta waxaa mas'uulka ka ah Guddiga Keydka iyo Amaahinta iyagoo adeegsanaya Bangiga Dhexe ee Qaranka.
2. Sidoo kale Guddiga Keydka iyo Amaahinta wuxuu u xilsaaran yahay gudashada awooda qeynuuniga ah ee Guddiga Bangiga Dhexe ee Qaranka
3. Haddii aysan jirin amar ka duwan sharcigaan, wax is beddel ah ma jiro oo khuseeya ahmiyadda, qaabka shaqo iyo awoodaha xubnaha iyo ilaalinta shaqada Bangiga Dhexe ee Qaranka.

### Qod. 4
### Ururinta keydka iyo amaahda waqtiga gaaban, kan dhexe iyo waqtiga dheer

1. Qaabka soo ururinta keydka wuxuu noqon karaa sida soo socota:

    a) mid waqti gaaban oo waqtiga dib u soo celinta amaahda uu ka badneyn 24 bilood
    b) Mid waqtigiisu dhex yahay, oo soo celintiisa ay ka badan tahay 24 bilood ,kana yar 5 shano, kuwas oo fursadda bixinta deymaha aysan ka badneeyn 5 sano
    c) Mid waqtigiisu dheer yahay oo so celinta amaahdu ay ka sareyso 15 sano
2. Keydiinta iyo howlaha amaahda muddada dhexe iyo midda dheer looma xil sari karo hey'adaha keydiinta iyo hawlwadeennada amaahda muddada gaaban. Laakin hey'adaha caadiga ah waxay noqon karaan xubno khaas ah ee maamuli karo amaahda muddada dhexe iyo muddada dheer oo leh shaqsiyadda qaynuuniga ah iyo misaaniyad u gaar ah. Amarradda qodobkaan ma lagu dabaqi karo Bangiga Dhexe ee Qaranka.

**Qod. 5**
**Reebbanaanta howlaha ka baxsan amaahda**

Waxaa ka reebban in hey'adaha amaahda bixiyo in ay ka qeyb galaan howlaha ganacsiga, warshadeynta, beeraha oo aan khuseynin howlaha amaahda.

## CINWAANKA 2AAD
Hey'adaha amaahda ee Qaranka

**Qod. 6**
**Noocyada hey'adaha amaahda**

1. Haddii aysan jirin qeynuun gaar u ah, hey'adaha amaahdu waxay noqonayaan qayb saamiley ah. Ma jiri karaan mana howlgali karaan iyagoo horta helin ruqsad.
2. Saamiga hey'adahaasi waa mid magacley ah.

**Qod. 7**
**Ruqsadaha**

1. Ciddii daneyneysa in ay dhisaan hey'ad amah waa in ay arji u qortaa Guddiga Keydka iyo Amaahda ee Bangiga Dhexe ee Qaranka, iyadoo arjiga lagu xiri doono dasturka oo muujinaya magacyada maamulka , howl wadeennada, xarumaha hey'addaas ,faracyadiisa kale iyo shuruudaha kale ee ku carifan qodobka 30
2. Ruqsada furitaanka hey'adaha amaahda waxaa bixin kara oo keliya Guddiga Keydka iyo Amaahda kadib markii uu dhegeystay talada Bangiga Dhexe ee Qaranka
3. Shahaddada ruqsada furitaanka hey'adaha amaahda waxaa caddeyneysa tirada maalgashiga ee ugu yar ee dasturku qabo, waxaa kale lagu carifi doona xaaladaha gaarka ah oo haddii laga waayo ruqsaddu laftigeedu ay mid dhacday noqon doonta
4. Waxaa laga maarmaan ah in qodobada lagu dhisay hey'adaha amaahda iyo wax ka beddelka dasturka in uu ansixiyo notaayo rasmi ah si hey'adaha u qaabilsan diwaan gelinta ay u helaan nuqul la xaqiijiyey sida uu qabo nidaamkaan.

**Qod. 8**
**Furitaanka faracyo cusub**

1. Hey'adaha amaahda kama furi karaan dalka Jamhuriyadda Somalia ama dibedda farac kale haddii aysan marka hore ka helin ruqsad Guddiga Keydka iyo Amaahda

2. Ruqsadda furitaanka faracyadda cusub waxaa lagu heli karaa iyadoo la raacayo amarrada ku qoran qodobka sare ku xusan.

**Qod. 9**
**Howlaha hey'adaha amaahda**

1. Howlgalka hey'adaha amaahda iyo furitaanka farac cusub ee hey'adaasi waa in ay ku hirgalaan waqtiga loo qondeeyey, wixii muddo kororsi ah waa in ay arji u soo qortaan
2. Haddii la galo marxalado sida isku darka hey'adaha amaahda, ama kala diristooda ama baabi'intooda qaynuuniga ah wuxuu Guddiga Keydka iyo Amaahdu ku dabaqi doonaa nidaam gaar oo xata laali kara qodobada sharcigaan.

**Qod. 10**
**Isqilaafka**

1. Saraakisha dowladda iyo kuwa u shaqeeyo wakaaladaha dowliga ma loo oggola in ay noqdaan xubin Guddiga Maamulka, ama Xubnaha Ilaalinta Maaraynta Shirkada, Maamulaha la wakiishtay, Agaasime Guud iyo Agaasime hey'ad, ama xubno iyo xilaal la mid ah, iyadoo aan laga helin ruqsad Guddiga Keydka iyo Amaahda.
2. Mamulayaasha la wakiishay, horjoogayaasha, saraakisha iyo shaqaalaha hey'ad amaaheed ma qaadi karaan xillka Horjoogaha, Duqa magaalada iyo Agaasime hey'ado kale oo xataa ahayn kuwa amaahda, iyadoon laga helin fassax Bangiga Dhexe ee Qaranka, oo la xirira talooyinka hey'adaha amaahda ee khuseeya.

**Qod. 11**
**Hey'adaha qeynuuniga ah**

Waxaa halkaan la sugaya in hey'adda 'Credito Somalo' lagu dhisay amarka 22 Febaraayo 1954, lambarkiisu 3, oo lagu beddelay sharciga lambar 10 ee 30 Setember 1956

**CINWAANKA 3AAD**
Samaynta faracyo Hey'ado amaaheed ee Dibedda

**Qod. 12**
**Awoodda ruqsad bixinta**

1. Hey'adaha amaahda ee ajaanibka ah oo daneynaya in ay ka dhisaan dalka gudahiisa faracyo amaheed, waa in ay arji u soo qortaan Guddiga Keydka iyo Amaahda, iyagoo soo marsiinaya Bangiga Dhexe ee Qaranka. Arjigaasi waa in lagu soo lifaaqaa nuqulka rasmiga ah ee dastuurka, misaniyadii ugu dambeysay oo la ansixiyey, magacyada xubnaha maamulka iyo horjoogayaasha faraca la doonayo in la furo iyo maalgashiga loogu tala galay iyo wax allaaliyo wixii waafaqsan qodobka 30 ee sharciga.
2. Guddiga Keydka & Amaahda kadib markii uu dhegeysto talada Bangiga Dhexe ayuu ruqsadda furitaanka faraca cusub bixin doona.
3. Guddiga Keydka & Amaahda markii ay bixinayaan ruqsada furitaanka farac cusub waxay eegi doonaan sida sharci ahaan dowladda ay Hey'adda Amaahda ka soo jeeda ula dhaqanto hey'adaha amaahda ee waddaniga ah.
4. Qodob gaar ah ayaa ka mid noqon kara ruqsadda furitanka faracyo cusub kuwaas oo haddi la fulin waayo ay keeni karto in ay ruqsaddaasi dhammato.

5. Wax allaaliyo wixii isbedel ah ee yimaada kadib oggolaashaha in la furo farac cusub, lana xiriira farqadda 1aad ee isla qodobkaan waa in si degdeg lagu wargeliyo Guddiga Keydka iyo Amaahda, iyadoo loo sii marsiin doono Bangiga Dhexe

**Qod. 13**
**Waajibadka Hey'adda Amaahda ee ajaanibka ah**

1. Waxaa waajib ku ah Hey'adaha Amaahda ee ajaanibka, kadib markii lagu wargeliyey sida ku qoran faqradda ugu dambeysa ee qodobka sare ku xusan in 3 bilood gudahood in Hey'adasi la diiwan geliyo iyadoo la dhowraaya diwaan gelinta hey'adaha ajaaniba sida ku carifan Xeerka Madaniga. Fulinta wajibaakaani waa in uu kadib la geeyaa Bangiga Dhexe ee Qaranka.
2. Misaaniyada faracyada ajaanibta lagana furay dalka Somalia waa in uu noqdaa mid ka duwan midka guud ahaaneed oo loogu talagalay howlgalka dalka Somalia

**Qod. 14**
**Bilowga howlgalka- Furitaanka faracyada cusub**

Si loo bilaabo howlgallada iyo furitaanka faracyo cusub, waxaa la isticmaali doonaa nidaamka ku qoran qodobada 8 iyo 9 ee la xirira hey'adaha ajaanibka ah.

**Qod. 15**
**Hirgelinta xeerka maalgashiga shisheeye**

Hey'adaha Amaahda ee ajnabiga ah oo ka howl gala dalka Somalia waxaa lagu dabaqi doonaa Sharciga lambarkiisu yahay 10 ee 18 Febarayo 1960 oo khuseeya maalgelinta shisheeye, kaas oo carifaaya arrimaha hoos ku qoran:

a) Faracyada cusub waxeey la mid noqonayaan hey'adaha aan wax soo saarin;
b) Waxaa muhim ah in la helo ruqsadda sida uu xeerinayo qodobka 12 ee khuseeya diwaan gelinta maalgashiga dibedda
c) Misaaniyada loogu tala galay howlgalka faracyada lama kala wareejin karo iyadoo marka hore aan la helin fasaxa Guddiga Keydka iyo Amaahda
d) Hey'adaha Amaahda ee ajaanibta markii ay doonayaan in ay u soo gudbiyaan maalgashi faracyadooda ku yaalla Soomaaliya , haddii aynan loo baahneyn fasax, waxay si xor ah u soo gudbin karaan maalgashigaasi si toos ah iyadoo la isticmaalaya lacagta qalaad, kadib marki hay'adda danaynaysa ay codsi si toos ah ugu gudbinayso _ iyadoo adeegsanayso Bangiga Dhexe Soomaaliya _ mas'uulka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;
e) Kormeeridda xakameeynta xuduudaha howlaha deyn qaadashada gudahooda oo muddada dhexe iyo muddada dheer iyo amaahyada, iyo heshisyada amaahyada dalka dibediisa waxaa mudan in la raaco amarrada Guddiga Keydka iyo Ahmaada ee qodobadda 10 iyo 11 ee Sharciga 18 Febarayo 1960 lambarkiisu yahay 10 ku qoran.

**Qod. 16**
**Faracyada horay u jiray**

1. Hey'adaha Amaahda ee ajaanibka ah oo horay u jiray markii uu sharcigaani dhaqan galay uma baahna ruqsad gaar ah howlahooda oo way wadan karaan
2. Waxaa loogaga baahan yahay in soo hordhigaan Bangiga Dhexe ee Qaranka wax allaaliyo wixii dokumenti ah iyo macluumad, sida ku cad faqradda labaad ee qodobka 11 iyo in ay muujiyaan wajiibaadka ku cad qodobka 12.

3. Hey'adahaas horay u jiray waxay hoos imaan doonaan sha

**CINWAANKA 4AAD**

Tilmaamaha iyo foojignaanta soo ururinta keydka iyo howlgelinta adeega amaahidda

**Qod. 17**
**Waajibaadka Guddiga Keydka iyo Amaahda**

1. Guddiga Keydka iyo Amaahda wuxuu dejinayaa siyaasadda adeegga amaahidda oo taaba gelineysa horumarinta dhaqaalaha waddanka, abuurista dhigaalka iyo fursadaha dalka ee dhinaca amaahda
2. Guddigu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta amaradda sharcigaan, iyo kuwa hoos ku qoran sida:

   a) Caddeyn xadka canshuur dhimista iyo midda hormariska ah, sida uu ku talinaayo Bangiga Dhexe ee Qaranka faqradda 6 ee qodobka 16 ee Sharciga ee 30 Juun 1960 lambarkiisa 3 oo loo beddelay Sharciga lambarka 2 ee 13 Janaayo 1961
   b) In la xaddido, kadib talada Bangiga Dhexe , canshuurta tooska ah iyo midda dadban iyo howlaha keydka iyo xisaabaadka wareega;
   c) In la xaddido, kadib talada Bangiga Dhexe, sida ku qoran faqradda ugu dambeysa ee qodobka 10 ee Sharciga lamb.3 ee 1960, taas oo khuseeyo keydka hey'adaha amaahda
   d) In ay xiraan hey'ado amaaheed, haddii loo arko in ay fulin Karin howlahooda ama aysan ku jaangoneyn habka baahinta dalka gudahiisa
   e) In la carifo habraaca kormeerka Bangiga Dhexe ee ku samaynaayo hey'adaha dowliga ah ee adeegga amaahinta
   f) In la caddeeyo howlgalka miisaaniyada ee waqtiga loo qoondeeyey, qaabka shaqada, soo bandhigga misaaniyada
   g) Go'aan ka gaarista abaalmarinta loogu talaggalay adeegyada kala duwan ee bangiyada

**Qod. 18**
**Noocyada go'aannada Guddiga**

1. Go'aannada Guddiga Keydka iyo Amaahda waxay ku soo baxaan qaab dekreeto ee Wasaaradda Maaliyada, oo lagu daabacayo Faafinta Rasmiga, oo uu Bangiga Dhexe u gudbiyo hey'adaha daneeynaaya .
2. Iyadoo la dhowraayo amarrada Sharcigan Wasaarada Maaliyada si ku meel gar ah oo sababtay xaalad degdeg ah waxay soo saari karta go'aano. Taas oo lagu wargelin doono Guddiga fadhigiisa ugu horeeyo si lo helo ansixid.

**Qod. 19**
**Amarrada laga rabo fulintooda Bangiga Dhexe ee Qaranka**

1. Bangiga Dhexe waxaa waajib ku ah kormeerka in la fulieyey go'aannada Guddiga Keydka iyo Amaahda ee la xiriirka howlaha Hey'adaha amaahda
2. Taas waxaa u dheer iyadoo la xeerinaya waajiibka ku qoran sharcigaan, nidaamka fulinta shuruucda kale in ay amaro ku saari karto hey'adaha amaahda sida:
   a) Nidaamka khuseeya qiraallada amaanada ee la xiriira xaalaada hantida iyo dhaqaalaha si loogu oggolaado amaanada'
   b) Qaabka iyo la socod siisanta diwaanka oggolanshaha 'amaanada' (kaas oo tilmaamaya magacyada howlwadeenada codsaday)

c) Fulinta howlaha farac hey'adaasi, howlaha khasnadda, waqtiga furitaanka howsha xafiisyada iyo ganacsiga ee hey'adaha amaahda
d) Qaabka loo adeegsada beddelaadda ama kala wareejinta dararka bangiyada ee isla hey'addaasi

**Qod. 20**
**Sirta Xafiiska**

Wax allaaliyo wixii macluumaad ah ama keyd ah ee la xiriira hey'adaha amaahda ama la xiriira howsha shaqsi u shaqeeya waa ka reeban tahay in la faafiyo, saraakiisa u qaabilsan Bangiga Dhexe lana dhowraa sirta xafiiska, saraakisha hay'adaha amaahda waxay la mid yihiin sarkaal dowli ah, waana in ay dhowraan hab dhaqanka maamul.

**Qod. 21**
**Xadka howlaha ay Mamulayaasha iyo horjoogayaashu ay fuliyaan**

Xubanaha ka tirsan Golaha Maamulka, Guddiga Duqeyda ama kuwa u dhigma, Agaasimayaaha iyo kuwa loo xilsaaray in ay baa'biyaan hey'adahal amaahda sida ku cad qodobka 1aad ee isla sharcigaan, waxaa ka reeban in ay la galaan heshiis nooc kasta sida kala gadiida toos ah ama gudban hey'adaha ay maamulan ama ay horjoogaan ama ay ilaaliyaan haddii aysan helin go'aan wadareed ee xafiisyada sare ku xusan.

**Qod. 22**
**Ruqsada deymaha gudaha iyo dibedda iyo cabiradda sarifka qalaad**

Waxaa dekreeto sharci ee Wasaaradda Maaliyada ku saleeysay go'aanka Guddiga Keydka iyo Amaahda kadib markii la tixgeliyey talooyinka Bangiga Dhexe lagu jaan goy'in doonaa amaradda bixinta saamiga dalka gudahiisa ama gelista heshiisyada amaahidda dalka dibediisa iyo ka qeyb gelidda maaliyeed ee dalka Somalia dibeddasi sida qodobka 11 ee Sharciga lambarkiisu yahay 10 ee 18 Febaraayo 1960; waxaa kale oo waxaa isla dekreetadasi lagu carifi doona awoda cabirka qiimeynta saamiga ee ajanabiga ah oo noc kasta leh dalka gudahiisa.

**CINWAANKA 5AAD**
Amaradda Xeerka Ciqaabta

**Qod. 23**
**Faafin wararka qalqal galin kara suuqa amaahinta**

Haddii uusan falku ka sii weyneyn, cid allaliyo ciddi faafisa warar been abuur ah, ama lagu dardaray ee khuseeya hey'adaha amaahda si loo qalqal gelyo suuqa qiimeynta saami ama kalsoni la'aan ku ridda umada maal dhigatay hey'aadahasi wuxuu muteeysan doona xarig ilaa 5 sano iyo ganaax 10,000 ilaa 100,000 Shilin

**Qod. 24**
**Macluumad been abuur ah si lo helo amaah**

Haddii falku uusan ka cusleyn, Cid allaliyo ciddi u gudbisa macluumad been abuur ah ama warbixinno aan jirin ee la xirira dasturka, xaladda dhaqaale, iyo maaliyada hey'ad, taas oo ujeedadeedu tahay in uu u shaqsi ahaan u helo fursad deyn ama ugaga faa'ideyo hey'adda uu

daneynaya ama wax ka beddelo xaalada fursaddo usiinayo in amaahda loo ogolaado, wuxuu muteysan xarig ilaa 1 sano iyo ganaax ilaa iyo 50,000 Shilin

**Qod. 25**
**Keydka Ururinta ruqsad la'aanta ah**

Cid allaliyo ciddi iyaddo horay ruqsad u haysanin fulisa adeega soo ururinta keydka nooc kasto ha ahaadee ama isticmaala fursadaha bangiga sida ku qoran faqradda 3 ee qodobka 1, ama dayaca in uu soo diro dokumentiga suurta gelinaya ruqsad siin wuxuu muteeysan doona ganaax 10,000 ilaa 100,000 Shilin.

**Qod. 26**
**Dayacaadda dhowrista amaradda keydka iyo amaahinta**

Ciddi diida ama dayacda fulinta amaradda guud iyo kuwa gaarka oo si sharci ah loogu caddeyey wuxuu muteysan doona ciqaabta soo socda:

a) Ganaax ilaa 50,000 Shilin haddii amardiidadu khuseyso amaradda Bangiga Dhexe
b) Ganaax ilaa 100,000 Shilin haddii amardiidadu khuseyso amaradda Guddiga Keydka iyo Amaahda

**Qod. 27**
**Mas'uuliyadda madaniga ah**

Hey'adda Amaahda ee wakiilkeedu, ama horjoogaheeda ama shaqaalaheedu ku cadato dayacaad ama amardiidyada ku qoran qodobda 24 iyo 25 wuxuu qaadaya mas'uuliyad madani in uu dhibo ganaaxa iyo magdhaw markii laga reebo in hey'addu dib u soo ceshato

**Qod. 28**
**Mas'uuliyad ciqaabeed**

Qaadista fal dembiyeedka ku qoran qodobada sare ku xusan waxaa iska leh Maxkamadda Gobolka ee Muqdisho

**CINWAANKA 6AAD**
Amaradda gunaanadka ah

**Qod. 29**
**Is dhexgelidda shurucda**

Dowladda waxay xaq u yeelaneysa soo saarista Dekreeto-sharci, 24 bilood gudahooda hirgelinta Sharcigaan, xeerar kale oo xeerinaya nidaamka hey'adaha amaahda, howlaha bangiyada (oo ay ka mid yihiin kuwaa amaahda khaaska ah), iyo samiyada amaahda

**Qod. 30**
**Amaradda fulinta**

Seddax bilood gudahooda markii la hirgeliyey Dekreeto sharcigaan ee Wasaaradda Maaliyada kadib talada Golaha Wasiiradaha, waxaa la soo saari doona qaabka amaradda fulinta.

**Qod. 31**
**Amaradda la buriyey**

Amarkasta ee ka soo horjeeda Sharcigan waa la buriyey

Sharcigaan waxaa lagu faafin doona Faafinta Rasmiga ah ee shurucda iyo dekretooyinka dalka Somalia

Sharcigan waa in loo dhowra sidii Sharci dalka u degsan

Taariikhda 14 Agoosto 1963, Muqdishu

Raisul Wasaaraha u meel gaarka ah

Mohamud Abdi Nur

Wasiirka Maaliyada

Abdulkadir Mohamed Ade

**Aden Abdulle Osman**